# Hubinta in qoyskaagu uu diyaar yahay haddii lagu masaafuriyo adiga

Making sure your family is ready if you get deported



Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay kaa caawin kartaa inaad hubiso in adiga iyo qoyskaagu aad diyaar tihiin haddii lagu musaafuriyo ama adiga iyaga lagaa sooco. Waxaa ku jira liiska waxyaabaha ay tahay in laga fakaro:

- Dukumiintiyadda & Aqoonsiyadda
- Ilmaha
- Lacagta
- Gawaarida & Guriga Kiradda ah

## La hadal qareen!

Mar walba waa ay wacan tahay in lala tashado qareen laanta socdaalka sharciyadeeda yaqaan haddii aad ka walwalsan tahay in lagu masaafurin karo. Barta LawHelpMN waxa ay haysaa qareemo ay dhici karto inay ku caawiyaan. Mari koodka QR ama gal shabakadda: lawhelpmn.org/providers-and-clinics.

Si aad u akhrido warqadan xoga aruursan ah oo Ingiriis ah ama Afaf kale ah, booqo: lawhelpmn.org.

**Warqadan xogta aruursan ah waxaa sameeyey iskaashiyo dhexmaray hay'adaha Immigrant Law Center of Minnesota, Mid-Minnesota Legal Aid, Southern Minnesota Regional Legal Services, The Advocates for Human Rights, iyo the Volunteer Lawyers Network. Waxaana gargaaray maalgeliyey laga helay Waaxda Adeegyadda Bulshadda ee Gobolka Minnesota (State of Minnesota Department of Human Services).**

# Dukumiintiyadda & Aqoonsiyadda

## sameyso qorshe xaaladaha degdeg ah wax ka qabta.

Qor qorshahaaga xaaladaha degdeg ah wax ka qabanaya. Qor sidda loola xiriiro dadka xigtada ah ee muhiimka ah, akhbaarta laanta socdaalka (immigration), iyo akhbaartaadda caafimaad. Waxa ay ka caawin qoyskaagu inuu ogaado waxa la sameeyn karo haddii lagu qabto. "Waxa aan leenahay xaquuq' waxa uu hayaa foom banaan (blank form) oo aad buuxin karto. Ka hel barta: wehaverights.us/create-an-emergency-plan.

- **La wadaag qorshaha qofka degdega loola xiriirayo.** Qofkaasi waa inuu noqdaa qof aad runtii aaminsan tahay. Waa muhiim inuu qofkaasi ogaado meesha laga heli karo qorshahaaga xaaladaha degdeg ah lacala haddii ay ku qabato hay'adda ICE ama lagu musaafuriyo. **Marna ha la wadaagin qorshahaaga xaaladaha degdeg ah hay'adda ICE.**
- **Kala hadal qoyskaaga qorshahaaga.** Adigoon ka walwalsiin, la socodsii ilmahaaga cidda haynaysa haddii adigu sababtu si kastaba ha noqotee aadan awoodin inaad hayso.
- **Hubi in qofka degdega loola xiriirayaa uu haysto aaladdda sheegaha meesha uu ku jiro qofka ICE u xirnaha ah.** Si aad u baarto qof hay'dda ICE u xiran, gal barta: locator.ice.gov/odls/homePage.do

## Ka fakar u helida dal-ku-galo (passports) qoyskaaga, khaasan ilmaha.

Waxay noqon kartaa muhiim in cid walba ee qoyska ka mid ah inay haysato dal-ku-galyo (passports). Qof walbaa waxa uu u baahan yahay dal-ku-gal (passpaort) si uu ugu socdaasho caalamka, oo ay ku jiraan ilmahu. Waxa aad u baahan tahay dal-ku-gal (passport) si aad u socdaasho xataa haddii lagu musaafuriyo**. Haddii ilmahaagu uusan haysan dal-ku-gal (passport) waa lagaa reebi karaa haddii lagu masaafuriyo.** Ma ay awoodi doonaan inay kula socdaalaan ama ay kugu soo biiraan dal-ku-gal la'aantii. Waalidiintu waa inay u qaadaan dal-ku-galyo ilmaha. Ilmaha yaryari ma heli karaan dal-ku-gal waalid la'aan.

- **Ilmaha ku dhashay wadanka United States** waa inay xaq u yeesheen dal-ku-galka (passport) Maraykanka (U.S.). Barta LawHelpMN waxa ay haysaa warqad xog aruursan ah oo kuu sheegaysa sidda loogu dalbo dal-ku-gal (passport) ilmo ku dhashay United States. Mari kooda QR ama gal mareegta: https://www.lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/passports-children-born-us.

- **Haddii adiga ama ilmahaagu ay ku dhalateen wadan kale,** waydii safaaradda ama qunsuliyadda wadankaa akhbaar ku saabsan helida dal-ku-gal (passport).
- **Qaar ka mid ah ilmahu waxaa dhici karta inay xaq u yeeshaan labaddaba** dal-ku-gal (passport) Mareykan (U.S.) iyo dal-ku-gal (passport) ay ka helaan wadanka ay waalidkood ku dhasheen.

## Ku xafid dukumiintiyadda muhiimka ah meel amaan ah.



Waa inaad ku xafidaa dhamaan dukumiintiyadaadda muhiimka ah meel amaan ah. Kuwaa waxaa ku jira:

- Dal-ku-galo (passports)
- Warqadaha dhalashadda
- Warqadaha caafimaadka
- Sharciyadda laanta socdaalka (Immigration)
- Warqadaha maxkamadda
- Warqadaha mulkiga gurigaagga ama gaarigaagga
- Akhbaarta bangigga

U sheeg **qof aad aaminsan tahay** meesha dukumiintiyaa muhiimka ahi ay yaalaan lacala haddii lagu qabto ama lagu masaafuriyo.

Waa ra'yi wacan inaad mar walba sidato qaar dukumiintiyadda ka mid ah. Taasi waxa ay ku xiran tahay nooca sharciga laanta socdaalka (immigration) ee aad haysato. Waydii qareenkaaga laanta socdaalka (immigration) haddii ay jiraan wax dukumiintiyo ah oo ay tahay inaad mar walba wadato.

# Ilmaha

## Diyaarso qof ilmahaaga kuu haya.




Haddii aad ka walwalsan tahay in lagu masaafuriyo, Diyaariso xaashida Wareejinta Mas'uuliyadda Waalidka [Delegation of Parental Authority (DOPA)]. DOPA waa dukumiinti u ogolaada qof kale inuu kuu hayo ilmahaaga haddii aadan adigu awoodin inaad haysato. **Waxa aad u baahan tahay inaad u sameyso DOPA u gaar ah ilmo walba.**

- DOPA waxa ay **siisaa** qof kale ogolaansho ah inuu gaaro go'aan ku saabsan daryeelida ilmahaaga, daryeeladda caafimaad, haynta iyo hantidda.

- DOPA **ma siiso qofkaa** ogolaansho uu ku go'aansado waxyaabaha sidda koriino u qaadasho ilmaha ama guur.
- DOPA **kaama** qaado wax xuquuqdaadda ah si aad go'aan ugu gaarto ilmahaaga. Waliba waa aad joojin kartaa wixii go'aan ah oo uu gaaro qofka aad ku magacowday DOPA. Barta LawHelpMN waxa ay haysaa xog aruursan oo kaa caawin karta inaad buuxiso xaashidda DOPA. Mari kooda QR ama gal mareegta: https://www.lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/delegation-parental-authority-dopa.

## Waxyaabaha aad u baahan tahay inaad ogaato haddii aad haysato ilmo iskuulka dhigta.




Tacliintu waa xaq iyo waajib Minnesota. Dhamaan ilmaha da'ahoodu u dhaxeeyaan 7 ilaa iyo 17 jirka waa khasab inay iskuul dhigtaan. Kuwaa waxaa ku jira ilmaha muhaajiriinta ah. Waxa ay kuu keeni kartaa dhibaato dhanka sharciga ah haddii uu ilmahaagu marmar badan iskuulka gafo. Barta LawHelpMN waxa ay haysaa xogta aruursan oo kuu sharxi karta waxa dhaca haddii ilmahaagu uu iskuulka gafo. Mari kooda QR ka ama gal mareegta: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/keeping-kids-school-preventing-truancy.

Haddii aad haysato DOPA, hubi in qof iskuulka joogaa uu nuqul (copy) ka haysto. Kolkaa haddii aadan ka soo qaadi karin ilmahaaga iskuulka, waxaa jiri qoraal ah cidda soo qaadi karta. Iyo cidda ka mas'uulka ah iyaga haddii aadan adigu joogin.

# Lacagta



### Ka digtoonow khatalaadaha.

Dad ayaa la soo xiriira muhaajiriinta iyagoo iska dhigaya inay siinayaan caawimaad si kolkaa ay u qaataan lacagtaada iyo hantidaadda. Ka digtoonow cid walba oo ku soo wacda, dhambaal (text) ama warqad kuu soo dirta iyagoo kuugu baaqaya inaad ku darto magacooda akoonkaaga bangiga ama buuga mulkiga gaariga. Ha siin wax akhbaar shakhsiyan ah hana saxiixin waxna adigoon la hadlin qareen.

## Samayso akoon bangi oo leh in khadka (online) laga geli karo.



Waxa aad rabtaa inaad awoodo inaad heli karto lacagtaada haddii lagu musaafuriyo.

- **Sameyso akoon bangi oo leh in khadka (online) laga geli karo.** Taa macnaheedu waa aad eegi kartaa akoonkaaga kana saari kartaa lacag adigoo khadka (online) isticmaalaya. Khasab kuguma ah inaad bangigga aado.
- **Hubi in bangiggu kuu ogolaado inaad ka gali karto akoonkaaga meel walba oo aduunka ka mid ah.**

- **Hayso baaqaaga (passwords).** Kor ka xusuuso baaqaaga (passwords), mar walbana wado adigu, ama ku hayso maamulaha khadka (line).

Siddoo kale, ka fakar inaad sameyso akoon bangi oo qof kale kugula qoran yahay. Akoonkani waa mid ay wdaagaan 2 qof ama in ka badan oo dad ahi. Cid walba oo magacoodu ku qoran yahay akoonka ayaa lacag ku ridi karta akoonka. Siddoo kale waa ay ka saari karaan lacag akoonka. Waxaa jira khataro ku saabsan lahaanshaha akoon labo qof ku wada qoran tahay. Qofka kale si sharci ah ayuu lacag ugala bixi karaa akoonka adigoon ogolaan. Waa muhiim inaad dhabtii qofkaa aaminsan tahay haddii aad la wadaagayso akoon bangi.

## Xir ama la soco kaararka amaahda (credit cards).



Waxa aad mas'uulka tahay deynta kaarka amaahda (credit card) iyo daymaha meel kastaba aad ku noolaatide. Sharciyan waa inaad bixiso xataa haddi lagu musaafuriyo.

Haddii aad ka tagto Mareykanka (U.S.) adigoo deyn lagugu leeyahay, waxaa jira waxyaabo shirkadda kaarka amaahdu (credit card), ay sameyn karaan oo saameyn kugu yeelan kara adiga ha dhow haddii mar uun aad soo noqoto.

- **Haddii aad gafto bixinta amaahda kaarka hal bil,** waxay u badan tahay inay jiri doonaan khidmaddo iyo ganaaxyo lagu daro deyntaaddii hore.
- **Haddii deyntu ay gaarto heerarka qaarkood,** aadana dirin lacag, shirkadda kaarka amaahdu waxaa dhici karta inay kansasho kaarkaaga amaahda. Waxaa dhici karta inay deynta ka gadaan qolo deyn aruuriye ah.
- **Deyn Aruuriyahu** waxaa dhici karta inuu ku dacaweeyo si ay u helaan lacagtooda. Waxa ay kala bixi karaan lacag akoonkaaga bangigga.
- **Bixinaha lacagta ee la gafo waxaa loo sheegi karaa hogaamadda amaahaga (credit bureaus).** Taasina waxa si xun u saameyn kartaa dhibcaha kiridhidkaaga ee Mareykanka

(U.S.), Taasina waxa ay ka dhigtaa wax adag inaad deyn hesho, gaari gadato ama aad guri kiraysato haddii aad ku soo noqoto Mareykanka (U.S.).

# Gawaarida & Guriga Kiradda ah

## Go’aanso waxa aad ku sameynayso wixii gawaari ah ee aad leedahay.

Haddii gaari aad leedahay, waxa aad ku dari kartaa qof labaad buuga mulkiga gaariga. Taa macnaheedu waa waxa ay gaariga kuula yeelan si isle’eg adiga. Haddii lagu qabto ama lagu masaafuriyo, waxa uu gaari karaa qofkaasi go’aan gaariga ku saabsan. Sidda, bixinta lacagta caymiska gaarida ama cusboonaysiinta taarigadda. Waxa taasi caawin haddii aad u baahato in gaariga la gado.  Laakiin ku darida qof kale buuga mulkiga gaarigu sidoo kale waxa uu leeyahay khatarteeda. Haddii qof kale uu kugula qoran buuga mulkiga ee gaarigaaga, sharciyan waa ay gadi karaan gaarida ama waa ay iska qaadan karaan xataa haddii aadan adigu doonayn inuu qaato.

## Haddii ay khasab noqoto inaad degdeg uga baxdo guri kuu kiraysan.

Haddii lagu qabto ama degdeg laguu masaafuriyo, waxaa dhici karta inaadan awoodin inaad bixiso kiradda waqtigii la rabay in la bixiyo. Heshiiska (lease) guriga aad ku degan tahay waxaa dhici karta inuu dhaco, inta aad maqan tahay. Qoladda guriga aad uga jirtaa waxaa dhici karta inay warqado dacwo ah ka xareysato maxkamad si guriga lagaaga saaro haddii kiradda aad la soo daahdo ama heshiiska (lease) guriga aad ku degan tahay uu dhamaado. Haddii maxkamaddu ay ogolaato in guriga lagaa saaro, alaabtaada cid ayaa la iska siin karaa haddii qoyskaagu uusan joogin si uu u qaato. Barta LawHelpMN waxa ay haysaa xog aruursan oo ka hadasha waxa aad sameyn karto si aad ula soo noqoto alaabta kolka aad guurto. Mari kooda ama gal: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/getting-property-back-after-you-move-out.

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.* Ha isticmaalaan xogtan urursan haddii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**